Qofka jecel in loo waasiciyo irsaaqadiisa oo loo dheereeyo cumrigiisa, ha xiriiriyo Qaraabadiisa

Anas Binu Maalik Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: "Qofka jecel in loo waasiciyo irsaaqadiisa oo loo dheereeyo cumrigiisa, ha xiriiriyo Qaraabadiisa."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku booriyey in Qaraabada lagu xiriiriyo booqasho, in la karaameeyo jir ahaan, Xoolo ahaan iyo wixii la mida, waxayna sabab u tahay irsaaqada oo la waasiciyo iyo cimriga oo la dheereeyo.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/5372